# Warbixin ku saabsan CPUP - barnaamij dabagal heer qaran ah oo loogu talagalay dadka maskaxda ka dhaawacan (CP)

Markaad tahay qof weyn oo qaba cudurka CP, waxaad halis u tahay inaad ku xanuunsato oo uu kugu adkaado dhaqdhaqaaqu markaad sii weynaato. Waxay noqon kartaa dhibaatooyin dhinaca dheellitirka, murqaha oo adkaada (spasticitet), tamardaro, dhibaatooyin dhinaca sinta/misigta, laabatooyinka/kala-goysyada oo adkaaga (kontrakturer) ama qalooca dhabarka oo sii kordha (skolios). Hadaanu goor hore ogaano inuu sii xumaanayo, markaa way noo fududahay in laga hortago inuu ka sii daro. Sidaa darteed, ayaanu adiga oo qof weyn ah hadda kuugu soo bandhignay inaad sidoo kale ka qaybgasho barnaamijka dabagalka ee CPUP.

**Ujeeddada CPUP**
Iyada oo la adeegsanayo barnaamijka dabagalka ee CPUP, waxaanu rabnaa inaanu hubinno in dadka halista ugu jira xanuunada kaga dhaco meelaha laabatooyinka/kala-goysyada (kontrakturer) ama kala-baxa misgaha/sinta (Höftluxation) in la ogaado oo ay helaan daaweyn wakhtigeeda. Hadafka ayaa ah in aanu qofna noqon qof jirkiisu tigtigay yahay/adag yahay, oo uu jirku xanuuno ama sintu/miskuhu kala-baxaan (Höftluxation) iyo inuu qof kastaaba helo dhaqdhaqaaqa ugu fiican ee suurtogalka ah.

**Sidee ayuu dabagalku noqonayaa?**
Muddo hadda laga joogo dhowr sano, dhammaan carruurta iyo dhallinyarada Iswiidhan ee qaba cudurada maskaxda dhaawaca waxaa loo soo bandhigay in lagu sameeyo dabagal joogto ah oo ku saabsan CPUP. Laga soo bilaabo 2009, waxa dadka waaweyn iyagana xitaa loo sii waday in dabagal lagu sameeyo cudurka maskaxda dhaawacay. Xakamaynta dadka waaweyn badanaa looma baahna inta badan sida wakhtiga uu qofku dhalinyarada yahay. Waxaad xaq u leedahay inaad joojiso ka qaybgalkaaga wakhti aad doonto.

Dhaqdhaqaaqa jirka ee kala duwan waxaa cabbiraya dhakhtarka jimicsiga/dhakhatarka dhaqdhaqaaqa iyo tababarka xubnaha inta lagu guda jiro baaritaanka. Cadaadiska murqahaaga, awoodaada dhaqdhaqaaqa iyo hawlaha kale sida shaqada gacanta, isgaadhsiinta iyo awooda wax cunida iyo wax liqidda waa la qiimaynayaa. Waxaa lagu weydiinayaa su'aalo ku saabsan shaqadaada maalinlaha ah, xanuunka, daalka ama xanuunada kale. Daawada adiga lagu siinayo ayaa lagu sifaynayaa. Dib u hubinta ayaa la barbar dhigayaa baarintaanadii hore si loo eego haddii ay wax isbedeleen. Waxaa la qiimaynayaa haddii daawayntaadu u baahan tahay in wax laga beddelo si loo wanaajiyo awoodaada dhaqdhaqaaqa ama si looga hortago inaad ka sii xumaato.

Dadka halista ugu jira inay qaadaan lafa qalooca dhabarka (skolios) ama miskaha oo sii kala-baxa waxa lagu eegaa raajo. Haddii raajo loo baahdo, dhakhtarka lafaha ayaa go'aan ka gaaraya isaga oo kaashanaya macluumaadkii laga helay baaritaanka iyo sawiradii hore ee raajada.

### CPUP waxay ka hortegeysaa sii xumaanshaha waxaanay wanaajinaysaa daryeelka

Kala-baxa miskuhu (Höftluxation) wuxuu ka hortegey ku dhawaad dhammaan carruurtii iyo dhallinyaradii lagu sameeyey barnaamijka dabagalka. Dad aad u yar ayuu ku dhacay inay laa-batooyinu/kala-goysyadu adkaadaan (kontrakturer) ama lafaha dhabarku qaloocsamaan (sko-lios). Tirada qaliinka lafaha ee dhabar qaloocu wuu yaraaday.

Dadka ka qaybqaadanaya barnaamijka CPUP waa la diiwaangelinayaa, ilaa si cad loo codsado wax kale mooyaane, dhammaan macluumaadka ku saabsan daawaynta qofka, awooda dhaqdhaqaaqa iyo natiijooyinka raajada waxaa la gelinayaa diiwaanka tayadda qaranka. Iyada oo la ururinayo dhammaan xogta dadka maskaxda ka dhaawacmay ee ku jira kaydka xogta diiwaanka tayadda qaranka, waxa kordhaya fursadaha lagu horumarinayo ee lagu hubinayo tayadda daryeelka caafimaadka iyada oo la adeegsanayo tiro badan oo xog ah oo laysu ururiyey lana qiimeeyey. Xogta la ururiyey waxay sidoo kale gacan ka geysanaysaa aqoon cusub oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee loo daaweyn karo dhibaatooyinka ku xeeran cudurada maskaxda iyadoo laga helayo sawir guud oo ah hababka daaweynta ee dalka oo dhan. Aqoontan waxaa loo isticmaalaa horumarinta shaqada daryeelka caafimaadka ee dadka qaba curada maskaxda. Haddii ay dad badani ka qaybqaataan natiijadu waxay noqon doontaa mid lagu kalsoonaan karo.
Marka macluumaadka lagu diiwaangeliyo kaydka kumbiyuutarka ee diiwaanka tayadda waxay markaa u fududaynaysaa kooxda daawaynta inay dabagal ku sameeyaa qofka shak-hsiga ah horumarkiisa iyo daawayntiisa. Xitaa haddii uu qofku u wareego daryeel bixiye kale, daaweynta ayaa la raacin karaa iyada oo macluumaadka loo wareejinayo kooxda cusub, waase haddii aanu qofku codsan inuu joojiyo diiwaangelinta wakhtiga uu wareegayo.

Kaydka badan ee kumbiyuutarka diiwaanka tayadda qaranku wuxuu ka kooban yahay xee-rarka sirta ee daryeelka caafimaadka iyo xeerarka kormeerka xogta (Datainspektionens). Taas macnaheedu waa in aan qofka shakhsinimadiisa la aqoonsan karin marka warbixinta si guud laysugu soo ururiyo.

Waxa aad xaq u leedahay in aad iska dayso in xogtaada lagu diiwaan galiyo diiwaanka tayadda qaranka adiga oo aan saamayn ku yeelan dabagalka daawaynta ee waafaqsan barnaa-mijka CPUP. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in macluumaadkaaga laga saaro diiwaanka (eeg boggaga ku lifaaqan).

### Maxaad ka heleysaa Adigu CPUP?

Waxaad helaysaa baaritaanno ka hortag ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqaaga, si aad awood ugu yeelato inaad u ilaaliso sida ugu wanaagsan ee suurtogalka ah halkii aad caawimaad ka raadsan lahayd markay xaaladaadu ka sii xumaato. Markaa caadi ahaan aad bay u adag tahay in wax laga qabto. Waa baaritaan caafimaad oo ka hortag ah. Waxay inta badan la mid tahay baarista ilkaha ee caadiga ah: godad yaryar ayaa la helay oo la daaweeyaa muddo dheer ka hor intaan xidid la buuxin ama iliga la bixin.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CPUP waxaad ka heli kartaa boggaga ku lifaaqan iyo bogga internetka ee www.CPUP.se

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta tayadda Qaranka waxaad ka heli kartaa www.kvalitetsregister.se

Gunnar Hägglund
Takhtar sare, diiwaan hayaha CPUP
Remissgatan 4, Wigerthuset, 221 85 Lund
iimaylka: gunnar.hagglund@med.lu.se

## Warbixino kale oo ku saabsan diiwaanka tayadda qaranka ee CPUP

**Maaraynta xogta ku jira CPUP**
Maaraynta xogta shakhsiyeed ee ku jirta CPUP waxaa nidaamiya xeerka ilaalinta xogta, GDPR, iyo cutubka toddobaad ee sharciga xogta bukaan socodka, PDL. Macluumaadka ku jira diiwaanka tayadda ee CPUP waxa loo isticmaali karaa horumarinta iyo hubinta tayada daaweynta dhibaatooyinka la xiriira cudurka maskaxda oo keliya, si loo soo saaro tirakoo-byada iyo cilmi baarista caafimaadka-iyo daryeelka bukaanka. Xogta waxa kale oo laga yaabaa hubinta sirta ka dib, in loo gudbiyo qof u isticmaalaya macluumaadka mid ka mid ah saddexdan ujeeddo. Marka la ururinayo xogta, laguma darayo tobanka lambar ama magaca qofka ee xogta dhammaanteed waxa loo soo bandhigayaa si qarsoodi ah. Haddii ay dhacdo in xog laga saaro CPUP, waxa looga saari karaa si elektaroonig ah. Waxaad la xiriiri kartaa wakiilka ilaalada xogta wixii su'aalo ah ee ku saabsan xuquuqdaada.

Haddii aadan doonayn inaad ka qaybgasho CPUP, lagaama diiwaangelinayo wax macluumaad ah diiwaanka tayadda.

**Xarunta mas'uulka shakhsiga** maaraynta la xiriirta ururinta macluumaadka adiga kugu saabsan ee ku jirta CPUP waa maamulka gobolka ee Gobolka Skåne.

**Wakiilka ilaalada xogta ee** Gobolka Skåne wuxuu leeyahay ciwaanka: Dataskyddsombudet, Region Skåne, 291 89 Kristianstad. Telefoonka: 044-309 30 00. Iimeylka: region@skane.se

**Diiwaan hayuhu waa** Gunnar Hägglund, Ortopedkliniken, Skånes Universitetssjukhus, 221 85 Lund. Iimeylka: gunnar.hagglund@med.lu.se

# Sirta

Macluumaadkaaga waxaa ilaalinaya sirta caafimaadka iyo daryeelka bukaanka ee sharciga dadweyne u furnaanta iyo sharciga sirta (offentlighets-och sekretesslagen). Taas macnaheedu waxay sida caadiga ah ka dhigan tahay in macluumaadka adiga kugu saabsan ee ku jira diiwaanka CPUP la bixinkaro oo keliya haddii ay si cad ugu qoran tahay in aanay dhibaato ka soo gaarayso adiga ama qof kale oo aad qaraabo tihiin.

**Ammaanka**
Macluumaadkaaga ku jira diiwanka CPUP waxa laga ilaalinayaa dadka kale ee aanay khusayn. Waxa jira shuruudo u gaar ah in tallaabooyin laga qaado dhinaca ammaanka oo ay macluumaadkaaga helikartaa dadka ku hawlan arrimaha horumarka iyo hubinta tayadda daryeelka caafimaadka oo keliya, waa la hubinayaa in aanu helin qof aanay khusayni xogta, waxaana macluumaadkaaga lagu ilaalinayaa iyadoo la adeegsanyo furo sir ah waxaana lagu geli karaa oo keliya hab ammaan ah oo sugan.

**Helitaanka**

Dadka ka shaqeeya maamulka gobolkaaga caafimaadka ee warbixinta barnaamijka CPUP loo soo dirayaa waxay si toos ah u heli karaan macluumaadka ay ka sheegeen ee adiga ku khuseeya ee ay u soo direen diiwaanka CPUP. Ma jiro daryeel bixiye kale oo si toos ah u heli kara macluumaadkan. Sida qofka mas'uulka ka ah diiwaanka, diiwaan-hayaha ayaa ka qayb qaadan kara macluumaadka adiga ku khuseeya.

**Laga saaro wixii aan loo baahnayn (gallring)**
Kadib markuu go'aan ka soo baxo maamulka kaydka arkiifiyada ee gobolka Skåne, xogtaada waxa loo kaydiyaa ilaa iyo wakhti dambe oo taariikhi ah oo aan la sheegin, tirakoob ama ujeeddo cilmi baaris ah.

**Xuquuqdaada**

- Waa tabarruc, xaq ayaad u leedahay inaad iska dayso in macluumaadkaaga lagu diiwaangeliyo, diiwaanka tayadda.
- Waxaad xaq u leedahay in macluumaadka adiga kugu saabsan laga tirtiro diiwaanka tayadda wakhti kasta.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad ogaato in macluumaadka adiga kugu saabsan uu ku jiro diiwaanka tayadda iyo in aad hesho koobiga lacag la’aan ah, inaad hesho qoraal-diiwaan kooban. Waxaad xaq u leedahay inaad warbixinta ku hesho qaab elektroonig ah.
- Waxaad xaq u leedahay in la saxo macluumaadka adiga kugu saabsan. Waxaad xaq u leedahay in dhammaystir lagu sameeyo macluumaadkaaga.
- Shuruudaha qaarkood, waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadkaaga sida loo maaraynayo la xaddido. Tani waxay khusaysaa marka diidmooyinka kale la qiimeeyo. Xadidaadan macnaheedu waa in diiwaanka tayaddu aanu waxba ku samayn macluumaadka adiga kugu saabsan marka laga reebo sii wadista kaydinta.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad hesho warbixin ku saabsan qaybaha daryeelada caafimaadka ee helay macluumaadkaaga iyo goorta, waa taariikhda iyo wakhtiga marka isticmaaluhu uu akhriyey joornaalkaaga, ururka isticmaalay iyo cinwaanka (loggutdrag).
- Waxaad xaq ayaad u leedahay magdhaw haddii macluumaadka loo maareeyo si ka baxsan xeerka ilaalada xogta ama xeerka xogta bukaanka socodka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Hay'adda ilaalada badbaadada (l Integritetsskyddsmyndigheten), taas oo ah hey’adda ilaalada ee aaggan.

*Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamikja CPUP la xiriir:*
Diiwaan hayuhu waa Gunnar Hägglund
CPUP
Remissgatan 4, Wigerthuset
221 85 Lund

*Haddii aad rabto qoraal diiwaan kooban, u soo dir codsigaaga oo oraal ah:*

Diiwaan hayuhu waa Gunnar Hägglund
CPUP
Remissgatan 4, Wigerthuset
221 85 Lund

Cadee magaca diiwaanka iyo qaybta daryeelka caafimaadka ee warbixinta lagu ururiyey. Waa inuu codsiga qofku gacantiisa ku saxeexo.

*Haddii aad rabto in warbixintaada la tirtiro la xiriir:*
Diiwaan hayuhu waa Gunnar Hägglund
CPUP
Remissgatan 4, Wigerthuset
221 85 Lund

Cadee magaca diiwaanka iyo qaybta daryeelka caafimaadka ee warbixinta lagu ururiyey. Waa inuu codsiga qofku gacantiisa ku saxeexo.

*Haddii aad rabto helitaanka macluumaadka ku saabsan wixii ku dhacay xogtaada, la xiriir:*
Diiwaan hayuhu waa Gunnar Hägglund
CPUP
Remissgatan 4, Wigerthuset
221 85 Lund

Cadee magaca diiwaanka iyo qaybta daryeelka caafimaadka ee warbixinta lagu ururiyey. Waa inuu codsiga qofku gacantiisa ku saxeexo.